



XAASHI MURTIYEDKA U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

SIDA LOOGU DIYAAR GAROORO TORNAADO

Tornaado waa mid ka mid ah duufaana ugu qalalaase badan waxyaabaha ka dhaca dabeecadda, waxaanay tornaadooyinku yihiin khatar cimilo oo weyn oo ka jirta Bartamaha Ohio gaar ahaan min Abriil ilaa Luuliyo. Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin waxay soo saartay xogta soo socota oo ku saabsan tornaadooyinka si adiga iyo qoyskaaguba aad u bedbaaddaan.

Ogow halista qorshena lahaw:

- Ogaanshaha in ay Bartamaha Ohio tornaadooyinka u nugushahay waa tallaabada ugu horraysa oo lagu diyaargarobo. Xilliga tornado ee Ohio waa Abriil – Nofeembar; xilliga ugu daranna waa Abriil – Luuliyo.
- Mar haddii tornaadooyinku ay digniin yari ama la'aan ku dhufan karaan, waa in aad diyaar garowdaa inta aanay ku soo qaaabbiin si aad degdeg wax ugu qabsan karayso.
- Adeegga Qaranka ee Cimilada ayaa bixin doona tornaado eegto (*tornado watch*) haddii ay xaaladuhu yihiin kuwo u suuban in ay tornado carrada ka curato, waxaa la bixin digniin tornado haddii mid la arko ama raadarku uu sheego in ay mid suuroggal ka tahay aagga.

Tillaabooyin la qaado si tornaado loogu diyaar garoobo:

- Qorshayso waxaad yeeli lahayd haddii la baxsho tornaado dhawr ama digniin tornaado.
- libso raadiyaha cimilada ka diga ee laga helo dukaamo badan iyo internetkaba.
- Gurigaaga ka sii qorshayso gabbaad tornaado.
- Haddaad ku nooshahay guryaha guurguura ama dhisme kale oon nabdoonayn, gabbaad tornaado iyo meeshaad u mari lahaydba sii astayso.
- Markaad qorshaysato shaxdaada, muraajicee, adigoo dargelinaya tallaabooyinka hoose.

Haddii digniin tornaado laga bixiyo aaggaaga:

- Dhegayso. Digniina dibedda ee Franklin County waxay u dhawaaqi doonaan si dheer markii degmada laga soo saaro digniin tornaado.
- Si degdeg ah taxtiga, gabbaad duufaaneed, ama meesha dhismaha ugu hoosaysa u gal.
- Haddaanu jirin taxi, aad hoolwayga gudaha ugu jira ama qol yar oo gudaha ah oo aan daaqado lahayn, sida musqusha ama kaloosetka gal.
- Haddaysan taasi suuroggal ahayn, ka fogow daaqadaha oo aad bartamaha guriga. Hoos gal shay weyn oo faraajinta ka mid ah oo kakan, sida kursiga shaqada, miis culus qabsana. Gacmahaaga u isticmaal in aad ku ilaashato madaxa iyo luqunta.
- Haddaad joogto dibedda, gaari ku jirto, ama guri guurguura ku jirto, bannaanka u bax oo gabbaad ka dayo dabaqa ugu hooseeya ee dhismaha kaka nee kuugu dhaw. Haddaad midna heli karin, meel sheeb ah ku dhabbaco, adigoo gacmahaaga ku ilaalinaya madaxa iyo luqunta. Ha hoos gelin buundooyinka hayweeyada.

Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin, oo ah hay'ad dawli ah oo maxalli ah, waxay agaasintaa qorshaynta, tacliiminta, digniinta, waxqabadka iyo ka kabashada gurmada/musiibo ee degmadan oo dhan si ay u yarayso raadreebka xun ee ku iman kara dadka deggan meeshan iyo hantidooda.

Waxaa bixiyey deeq 2008 UASI waxaana la cusboonaysiiyey Oktoobar 2010

Xog Bulsho oo Gurmada oo ka Timid: (Emergency Public Information From:)

Franklin County Emergency Management and Homeland Security
5300 Strawberry Farms Blvd., Columbus, Ohio 43230
Phone 614-794-0213, Fax 614-882-3209
Email fcem&hs@franklincountyohio.gov
On the Web at www.franklincountyohio.gov/emahs/